



**Weli maku
khasbanahay
in aan bixiyo
taageerada
ilmaha haddii
aan xiranahay?**

**Wac xafiiska Qaybta Taageerada Ilmaha kuugu
dhow ama wac 800-442-KIDS (5437) si aad u
oggaatid xafiiska gacanta ku haya kiiskaaga.**

Xafiisyada Qaybta Taageerada Ilmaha

Everett	800-729-7580 425-438-4800
Kennewick	800-345-9981 509-374-2000
Olympia	800-345-9964 360-664-6900
Seattle	800-526-8658 206-341-7000
Spokane	800-345-9982 509-363-5000
Tacoma	800-345-9976 253-597-3700
Vancouver	800-345-9984 360-696-6100
Wenatchee	800-535-1113 509-886-6800
Yakima	800-441-0859 509-249-6000
Saldhigyada	800-457-6202 360-664-5000

Illuoyin Sharci

Mashruuca Caddaalada Northwest Ee Isku
xirka Waxbarashada Sharciya, Tallada Iyo
Wereejinta

(CLEAR) Mashruuca
888-201-1014
www.nwjustice.org

Xarunta Sharciya

Dumarka Northwest

Macluumaad Iyo Khad Wareejin
206-621-7691

Boggaga Internetka

Maxkamada

Kala xiriir maxkamadaha halkan

www.courts.wa.gov/

Qaybta Taageerada

Ilmaha DCS

PO Box 11520
Tacoma, WA 98411
www.dshs.wa.gov/dcs/
DCS-CRU@dshs.wa.gov

Rugaha Sharciya iyo

Macluumaadka Sharciya

wsba.org/atl/contact/legasst.htm

**Dhammaan
macluumaadka ku qoran
diwaanada Qaybta
Taageerada Ilmaha waa
kuwo sir ah**

Waxaad haysan kartaa qof (qarabo,
saaxiib ama qareen ah) oo adiga kuu
soo waca Qaybta Taageerada Ilmaha.
Waxaan ka jawabi karnaa su'aalaha
guud ee qofkasta, laakiin kama
hadlayno faah-faahinada kiska gaarka
ah aan ka ahayn haddii aynu haysano
ogogaansahaaga qoran.


TACOMA WA 98411-5520

PO BOX 11520

DIVISION OF CHILD SUPPORT



PLACE
STAMP
HERE



Ma la iga qaadayaa masuuliyada taageerada ilmahayga marka aan xiranahay?

Maya. Lacag bixinada taageerada ilmahaaga waa kuwo la iska rabbo bil kasta xitaa haddii aad xirantahay ama aad xabsi kujirtid.

Haddii aadan bixin karin, daynta taageeradaada way sii soconaysaa si ay u badato bil kasta aan ka ahayn haddii aad bedeshid amarka.

Maxaa ku dhacaya 20% laga jaro lacagta ku dhacaysa koontadayda maxbuuska?

Sharciga Gobolka Washington wuxuu u baahanyahay in Waaxda Sixitaanada (DOC) ay ka qaadata lacagta taageerada ilmaha waxyaabaha la kasbado, gunooyinka, iyo dheefaha magdhowga shaqaalayaasha adiga lagu siiyo. Lacagta ay qaataan waxaa halmar bishii loo diraa dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha (DCS) si loogu dabakho xaaladaha taageerada ilmahaaga. Haddii aynu helno wax ka baddan inta aynu kugu leenahay dheeraadka waxaa dib loogu celinayaa koontadaada xisaabta maxbuuska.

Maxaan Sameyn karaa?

Marka aad buuxisid foomka kujira qoraalkan kadibna noo soo dirtid, waxaad ka codsan kartaa Qaybta Taageerada Ilmaha in ay:

- Muraajaco kusamayso amarka taageerada ilmahaaga si loo yareeyo lacag bixinada taageerada hadda ah. Midaan waxay dib u hagaajin kusamayn kartaa amarka taageeradaada. Haddii aadan ku lahayn kiis Qaybta Taageerada Ilmaha, waxaad codsan kartaa adeegaheena.
- Yarayso ama tiro qaybta daynta taageerada ilmahaaga ee lagu leeyahay gobolka Washington. Hawshaan waxaa lagu magacaabaa Shirka Guddiga.
- Kuu soo dirto codsi loogu talagalay adeegaha. Waxaan samaynaa amarada aabanimada, iyo waxaan hagaajinaa, oona fulinaa amarada loogu talagalay taageerada ilmaha iyo caymiska caafimaadka.
- Sii daayaan waxa aynu hayno ee kusaabsan rukhsada baabuurkaaga.

Qaybta Taageerada Ilmaha ma bixiso adeego booqasho, xannaano, ama qorshe waalidnimo.

Sidee bedelida (hagaajinta) lagu sameeyo amarkayga ii caawinaysaa?

Taageerada ilmaha waa in la dejiyaa si ay uga turjunto xaaladaada hadda ah. Haddii aad doonaysid in aad bedeshid tirada lacagta adiga lagaa rabbo ee loogu talagalay taageerada hadda ah waxaa khasab kugu ah in aad dib u hagaajin ku samaysid amarka taageerada ilmahaaga.

- Bedelida taageeradaada hadda ah ma bedelayso inta daynta ah ee hore laguugu lahaa.
- Uma dhacayso si ootamaatik ah, waxaa khasab kugu ah in aad buuxisid warqada shaqada oona codsatid in bedelaada lagu sameeyo. Waxay qaadan kartaa bilooyin si bedelaad loogu sameeyo amarka waxaana khasab kugu ah in aad nala shaqaysid wakhtiga oodhan si arintaasi loo sameeyo.
- Amarka cusub wuxuu dejinayaa taariikhda bilaabashada isbedelka. Taariikhda bilaabashada ma ahaan karto taariikh kahor inta aadan u samaynin codsigaaga dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha, waxayna noqon kartaa mar dambe. Waa in aad u samaysid codsigaaga sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtoogalka ah.

Sideen u bedeli karaa tirada lacagta hore la iigu leeyahay?

Mararka qaar, ayada oo ay ku tiirsantahay xaaladahaaga guud, Qaybta Taageerada Ilmaha waay tixgelin doontaa in ay iska cafiso qaar ama dhammaan daynta taageerada ilmaha midaas oo lagu leeyahay gobolka Washington. Midaana waxay dhacdaa inta lagu guda jiro hawsha lagu magacaabo Shirka Guddiga.

Qaybta Shirka Guddiga ma cafin karto daynta si toos ah loogu leeyahay qof kale ama gobol kale. Si kastaba, qofka dad ku leh daynta taageerada ilmaha wuu cafin karaa daynta ay kugu leeyihiin. Haddii ay tahay midaasi sida ay ayagu rabaan waxaa khasab ku ah in ay lasoo xiriiraan Qaybta Taageerada Ilmaha si ay u helaan macluumaad baddan ama dheeri ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan helo oggaysiis cusub?

Qaybta Taageerada Ilmaha waxay kuu soo diri kartaa oggaysiisyo sharci marka aad xabsiga ku jirtid, ay kujirto oggaysiis lagu samaynayo taageerada ilmaha.

Ha iska indho tirin boosto ama fariin kaaga timid dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha!

Badanaa, waxaad haysataa 20 maalmood si aad uga jawaabtid oggaysiisyada sharciga aynu kuu soo dirno. (Oggaysiis kasta waxaa ku qoran macluumaad kusaabsan xuquuqahaaga.)

- Haddii aad diidantahay shuruudaha ku qoran oggaysiiska, waxaad na weydiisan kartaa caawimaad.
- Haddii aadan ka jawaabin oggaysiiska wuxuu si ootamaatik ah u noqonayaa mid kama dambays ah kadib marka ay gudbaan 20 maalmood waxaana bilaabaynaa in aynu fulino .

Ka waran rukhsadayda gaariga?

Noo sheeg goorta aad xabsi gashid ama shaqada-katagto kadibna waxaan sii dayn doonaa rukhsadaada gaariga aynu hayno waxaana ka dhigaynaa mid aynu dhowrno illaa 30 maalmood kadib marka lagu soo daayo.

Inta lagu guda jiro 30-kaan maalmood waxaad u baahantahay in aad markale nala soo xiriirtid si aynu uga wada shaqayno qorshaha lacag bixinta. Haddii aadan sidaasi samaynin rukhsadaada waxaa dhici karta in markale laga joojiyo dhinaca taageerada ilmaha. Sida ugu dhakhsiyaha baddan ee aad usoo wacdo Qaybta Taageerada Ilmaha sida ugu fudud ee aynu kuula shaqayno. Waxaan u baahanahay in aynu aruurino taageerada ilmahaaga hadda ah iyo wax ku aadan wax kasta oo dayn taageero ah.

Maxaa dhici doona marba haddii aan helo shaqo?

Marka aad leedahay waajib taageero ilmo waxaa lagaaga baahanyahay in aad nagu soo wargeliso markasta oo aad hesho shaqo cusub. Haddii aad nala soo xiriirtid marka aad heshid shaqo waxaan kaala shaqayn karnaa tirada lacagta aad bixisid bil kasta si aad isaga bixisid dayntaada.

Haddii aadan igu soo wargelin taageerada ilmaha marka aynu u dirayno lacagta xajinta qofka aad u shaqaysid waxay noqon kartaa bar ama nus ee jeegaaga lacag bixinta ah.

Wac Qaybta Taageerada Ilmaha anagana waan kula shaqayn doonaa!

Sharootada Halkan Ku xir Kahor inta aadan Dirin

Godsiga Macluumaadka Qaybta Taageerada Ilmaha

Fadlan iigu soo dir foomamka dhinaca:

<input type="checkbox"/>	Weydiiso Qaybta Taageerada Ilmaha in ay bedesho amarka(amarada) taageerada ilmahayga.	<input type="checkbox"/>	Codso adeegaha fullinta buuxda ee ka ahaata Qaybta Taageerada Ilmaha.
<input type="checkbox"/>	Weydiiso Shirka Guddiga.	<input type="checkbox"/>	U oggolow qof kale in uu kala hadlo kiiskayga Qaybta Taageerada Ilmaha.
<input type="checkbox"/>	Anigu waxaan ahay qof xiran,fadlan sii daaya rukhsadayda.	<input type="checkbox"/>	Anigu waxaan ahay qof naafo ah waxaana u baahanahay caawimaad khaas ah.
<input type="checkbox"/>	Waxaan akhryn karaa Ingiriisi xadidan. Fadlan ku dir foomamka	<input type="checkbox"/>	Luuqada

Waxkale (sharax)

Anigu waxaan ku xiranahay

Taariikhda Qiyaasta Sii-dayntayda waa

Lambarka Kiiska Qaybta Taageerada Ilmaha

Magaca

Cinwaanka (Wadada ama PO Box

City

Gobolka

Furaha Xaafada

Shiixa

Taariikhda

Bisha

Maalinta

Sannadka